Oregon Department of Human Services

INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

# Fahanka kooxda adeega loogu yeedho "Carruurta qabta mid aad u hoosaysa ilaa baahiyaha taageerada hoose"

## Maxaa hagahan loogu talo galay inuu qabto?

Dhammaan carruurtu waxay u baahan tahay heerka taageerada ee qoyskeeda in caafimaad qab lagu joogo, badbaado, iyo farxad. Carruurta qaba naafooyinka garaadka iyo koriinka (I/DD) waxay u baahan tahay caawimada ka saraysa oo ka dheer waxa caadiga u ah dhammaan carruurta. Hgahan waxa uu kaa caawiyaa inaad fahanto waxa uu yahay adeega kooxda, sida go'aan looga gaadho, iyo waxa la samaynayo haddii aad diido kooxda adeega ilmahaaga. Macno ma leh waxay tahay adeega kooxda ilmahaaga loo magacaabay, ha iloobin in aad hogaamin doonto go'aan ka gaadhida waxay yihiin adeegyada ilmahaagu helayaa.

## Waa maxay Qiimaynta Baahiyaha Oregon?

Qiimaynta Baahiyaha Oregon (ONA) waxay naga caawiyaan gaadhida hiigsigaaga nidamka taageerooyinka ay fududahay in la isticmaalo iyo jawaab degdeg ah u ah awoodaha iyo tilmaanta dadka naafada ah iyo qoysaskooda.

Qiimaynta Baahiyaha Oregon waa agab uu isticmaalo Xafiiska Adeegyada Naafada Koboceed (ODDS) si loo helo macluumaad ku saabsan waxa uu yahay nooca caqabadaha ilmahaaga uu qabo haddii aanay haysan taageero. Waxaa dhammaystiray qofka loogu yeedho Qiimeeya, oo wata caawimada ka timid adiga, ilmahaaga, iyo dadka kale ee aad doorato.

Macluumaadka waxaa loo isticmaalaa inay caawiso adiga, ilmahaaga iyo kuwan aad doorato inay kaa caawiyaan qorshaynta, uu ka hadlo wax ku saabsan nooca ay tahay taageerooyinka waa mida ugu wanaagsan ilmahaaga.

Qiimaynta Baahiyaha Oregon (Oregon Needs Assessment) ma aqoonsato sida ilmahaaga loo taageeri doono, ama waxa caawin doono ilmahaagu inuu gaadho hadafyadaada — la sameeyo muddada nidaamka Taageerada qorshaynta gaarka ah. Adiga, ilmahaaga, iyo kuwa kale ee aad doorato, waxay go'aamin doonaan waxa ay tahay taageerada sida wanaagsan u buuxin doontaa baahiyaha ilmahaaga oo ka caawin doonto inay gaadhaan hadafyadooda. Qiimaynta Baahiyaha Oregon ee ilmahaaga waaa adeega ka yimaada kooxda oo ah hal qayb oo nidaamka qorshaynta ah.

## Sababtee ayay kooxaha adeegu muhiim u yihiin?

Haddii ilmahaagu helo adeegyada naafanimda koriinka sidaa hal ma mid ah taageerooyinka nolosha ilmahaaga, kooxdooda adeega waxay go'aan ka gaadhaa saacadaha u badan ee adeeg bixiyaha daryeelka ("adeeg bixiyaha") waxaa la bixin doonaa si loo taageero ilmahaaga bil kasta. Haddii ilmahaagu u baahdo adeegyada degista ee wakaalada, kooxdooda adeega ayaa go/aan ka gaadha sida adeeg bixiyayaasha hoyga loo bixin doono si ay u dayeelaan iyaga.

## Sidee loo go'aamiyay adeega kooxda ilmahayga?

Su'aalaha gaarka ah ee Qiimaynta Baahiyaha Oregon waxaa loo isticmaalaa in go'aan lagaga gaadho kooxda adeega ilmahaaga. Hagahan waa uu sii socon doonaa si uu u sharaxo dhab ahaan sida ay u shaqayso.

## Sidee adeegyada kooxda loo habeeyaa?

Kooxaha adeega marka koowaad waxaa abaabula da'da qofka, sida dhallaan/socod barad (dhalasho ilaa 3), ilma yar (4 ilaa 11), kuray (12 ilaa 17), qof wayn (18+). Gudaha heerka da' kasta, waxaa jira kooxaha adeega oo kala duwan oo ku salaysan baahiyaha taageerada.

## Maxaa sabab in qof loo qoondeeyo Ilmo yar: Aad u hooseeya ilaa kooxda adeega Hoose?

Ilmaha waxaa loo qoondayn doonaa koodan adeega iyaddoo ay sababtay wax ka mid ah kuwan soo socda:


- aad u yar ilaa dhexdhexaad baahiyaha taageerada guud ee la xidhiidha naafanimada ilmahaaga.
- dhif ahaan waxay u baahan tahay taageerada xooga la saarayo ee baahiyaha caafimaad iyo dhaqan.

Kuwan Ilmaha: Aad u Hooseeya ilaa Hoose kooxda adeega dhammaan waa shakhsiyaad gaara ah. Waxay ku jiraan isla koox adeeg sababtoo ah nooca heerka caafimada ay u baahan yihiin waa isku mid.

## Waa maxah baahida taageerada guud heelka qiimaynta Ilmaha: Aad u hooseeya ilaa Hoose?


Si loo qiyaaso baahida taageerada guud, xooga waxaa la saarayaa jawaabaha Qiimaynta Baahiyaha Oregon su’aasha ku saabsan hawlaha nolosha maalinlaha ah iyo hawlaha waxtarka u leh nolol maalmeedka (ADLs/IADLs). ONA waxay waydiisay wax ku saabsan hawlaha badan oo kala duwan oo ah nolol maalmeedka iyo inta ay leegtahay taageerada qofka u baahan hawlahan.

Su’aal kasta, jawaabaha waxay yihiin qiyaasta laga bilaabo 1 ilaa 6. Qiyaasta su’aal kastaa waxay u eegtahay:




Jawaabaha su’aalaha qaarkood ee ONA waxaa loo isticmaalaa si loo abuuro hal buundada guud ahaaneed Baahida Taageerada Guud (GSN) buundo.

Jawaabaha koowaad ee ku saabsan lebiska iyo dhaqaaqa ONA waxaa la isugu xidhaa labba sheey:




Markaa, lebiska iyo dhaqaaqa waxaa lagu daraa jawaabaha su'aalaha kale. Waxaa jira sideed su'aaloo oo lagu daro caruurta ah 5 ilaa 11 sano jirka. Waxay yihiin:

| | | | |
|---|---|---|---|
| Xidhashada / Iska bixinta kabbaha | Cunista | Sixada musqusha | Tuushaka/ maydhashada |
| Nadaafada Afka | Nadaafada kale ee guud | Lebiska | Dhaqaaqa |

Haddii aad doorato inaanaan ka jawaabin su'aasha ONA ama su'aasha aanay habboonayn, jawaabtaas waxa la siiyaa buundo ah 1. Haddii hawsha aan la isku dyeyin iyaddoo ay sababtay xaalad caafimaad ama walaaca badbaadada, jawaabtaas waxaa la siiyaa buundo ah 6.

## Ku darida Buundada Da'da

Wixii ah carruurta, buundada daa'da ku darida waa la sameeyaa sababtoo ah dhammaan carruurta da'da yar waxay ku tiirsan yihiin daryeelayaasha badanka baahiyahooda maalinlaha ah. Si loo sameeyo buundada ku darida, lix su'aalood ayaa lagu daraa liiska sare. Su'aalahan waxay waydiiyaan wax ku saabsan shaqada guriga, samaynta cunto fudud, dhar maydhka, isticmaalka gaadiidka dad waynaha, maaryanta lacagta, iyo wax iibsiga

fudud. Qiimaynta Baahiyaha Oregon uma baahna jawaabaha su'aalahan. Carruurta heerkan da'da ah, su'aalahan si toos ah buundo loogu siiyaa 6 "ku tiirsanayaasha" markaas ku darida buundada carruurta 5 ilaa 11 sano jirka ah waa 36.

Wadarta buunda GSN waxaa ku jira ku darida jawaabaha sideeda su'aalood ee koowaad lagu daray da'da ku darida buundada 36. Carruurta leh buundada GSN ee u dhacaysa 44 iyo 53 waxaa loo qoondeeyaa Ilmaha. Aad u Hooseeya ilaa kooxda Adeega Hoose.

**Fiiro:** Carruurta da'ada 4 looma qoondayn kooxda adeegan. Carururtan, da'da ku darida buundadu waa 54, kaas oo ka sareeya buundooyinka suuragalka ah ee GSN ee kooxdan adeega. (Arag Fahanka kooxda adeega "Carruurta qabta baahiyaha taageerada dhexdhexaadka ah" iyo Fanka kooxda adeega ee "Carruurta qaba taageerada baahiyaha sare ilaa mid aad u saraysa")

Haddii aad jeceshahay inaad aragto Qiimaynta Baahiyaha Oregon ee ilmahaaga si aad u aragto inta buundo ee uu helay, waxaad ka heli kartaa Isuduwaha Adeegyada.

## Haddii aad khilaafto kooxda adeega loo qoondeeyay ilmahaaga

Adiga, iyo kuwan ku jira nolosha ilmahaaga, waxay si wanaagsan u fahmaan waxa ilmahaagu u baahan yahay si ay ugu guul gaadhaan hadafyadooda. Waxaad leedahay xaqa iyo dookhyada marka aanad aqbali go'aamada la gaadho ee ku saabsan adeegyada iyo taageerada ilmahaagu helo.

Linkigan hoose waxa uu faahfaahiyaa tallaabooyinka aad qaadi karto haddii aad aqbali waydo. Boggan waxay qeexayaan marka ilmahaagu uu u qalmo ka reebid aiyo sida loo soo xareeyo iyaga, siiba heerka dhegaysiyada iyo xuquuqaha rafcaanka iyo nidaamka.

Codso dhegaysi: https://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/Administrative-Hearings.aspx

Codso ka reebitaan: https://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/Exception-Step1.aspx

# Ilaha

## Halka wax badan lagu baranayo

Macluumaadka dheeraadka ah ee kus aabsan sida haykalka kooxda adeega loo horumariyay iyo waxay yihiin tallaabooyinka onlaynka xiga.

https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/Service-Groupings.aspx